

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 4aad	Cadadka: 3aad ee March	Taariikh: 04/04/2015
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) Sooma bixin</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u> <u>0460/032015</u></p>	136
--	-----

Aasaasida Xafiiska Diiwaanka
Sekeda



3) XEER MADAXWEYNE Lr:

0461/032015

Magacaabid,

4) XEER MADAXWEYNE Lr:

0462/032015

Magacaabid,

144

5) XEER MADAXWEYNE Lr:

0463/032015

Magacaabid,

145

6) XEER MADAXWEYNE Lr:

0464/032015

Beddel,

146

7) XEER MADAXWEYNE Lr:

0465/032015

Magacaabid,

147

8) XEER MADAXWEYNE Lr:

0466/032015

Magacaabid,

148

9) XEER MADAXWEYNE Lr:

0467/032015

Magacaabid

149

10) XEER MADAXWEYNE Lr:

0468/032015

Beddel

150

11) XEER MADAXWEYNE Lr:

0469/032015

Magacaabid

151

12) XEER MADAXWEYNE Lr:

0470/032015

Magacaabid

13) XEER MADAXWEYNE Lr:

0471/032015

Magacaabid

14) XEER MADAXWEYNE Lr:

0472/032015

Magacaabid

15) XEER MADAXWEYNE Lr:

0473/032015

Cafis Madaxweyne

16) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 27/03/15

17) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 27/03/15

18) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 04/03/15

19) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 04/03/15

20) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 14/03/15

21) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 14/03/15

22) XEER MADAXWEYNE, Xilka

Qaadis 14/03/15



153

154

155

156

157

158

159

160

161

162

163

164

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,

WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM



23) *Sooma bixin*

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

- | | |
|--|-----|
| 24) Diiwaan Gelin Shirikada HASHIMI
CONSTRUCTION AND INTERIOR DESIGN
COMPANY,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 166 |
| 25) Cadeyn Diiwaan Gelin Shirikada
NOJOOM GEMSTONE EXPORT
COMPANY,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 167 |
| 26) Diiwaan Gelin Shirikada RIO
ARCHITECS AND CONSTRUCTION
COMPANY,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 169 |
| 27) Diiwaan Gelin Shirikada SADAI
GOURMET FOOD,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 167 |
| 28) Diiwaan Gelin Shirikada BADBAADO
CARGO CLEARANCE (BCC),
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 169 |
| 29) Diiwaan Gelin Shirikada NEW
SOFTWARE TECHNOLOGY COMPANY,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 170 |
| 30) Diiwaan Gelin Shirikada RAY-KULAN
ENGINEERING CONSTRUCTION AND
CONSTRUCTING,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 172 |
| 31) Diiwaan Gelin Shirikada ATLAT | |

RESEARCH AND CONSULTING, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	173
32) Diiwaan Gelin Shirikada AFRICAN BUSINESS WIRE, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	175
33) Diiwaan Gelin Shirikada CEEL SHEIKH COMPANY, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	176
34) Diiwaan Gelin Shirikada NASRI CONSTRUCTION COMPANY, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	178
35) Diiwaan Gelin Shirikada KORJAN GROUP LTD, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	180
36) Diiwaan Gelin Shirikada TABAN TAABO CONSTRUCTION AND CONSULTING COMPANY, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	181
37) Diiwaan Gelin Shirikada HORN & GULF FOR SERVICE LTD, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	184
38) Diiwaan Gelin Shirikada GAFANE GROUP GROUP OF COMPANIES,	186
39) Faafin Xukun; Maxkamadda Degmada Hargeysa	187
40) Amar Xayiraad ka Qaadis (3) Guri No: Maxkamadda Gobolka Hargeysa	190
41) Magacaabid Garsoorayaal, Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka	193
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	
<i>Sooma bixin</i>	

QAYBTA LABAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNaha:**



REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3055/032015

DATE....07/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0460/032015

Aasaasidda Xafiiska Diiwaanka

Sekada

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 12aad, Faqradiisa 7aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Qoraalka Talada Wasiirka
Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta;

Wuxuu Go'aamiyey

Xeerkan oo lagu aasaasayo Xafiiska Diiwaanka Sekada ee
Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 1aad
Aasaasidda Xafiiska Diiwaanka Sekada

Waxa halkan lagu aasaasay Xafiiska Diiwaanka Sekada oo yeelanaya qofnimo qaanuuneed, shaambad u gaar ah iyo astaan, isla markaana hoos tegaya Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.

Qodobka 2aad
Aasaasidda Xafiiska Diiwaanka Sekada

Xafiiska Diiwaanku wuxuu si toos ah uga mas'uul yahay in uu si wanaagsan u guto una maamulo xilkiisa iyada oo uu qaadayo talaabooyin lagu ilaalinayo sekada, isaga oo raacaya sharciga dalka.

Qodobka 3aad
Ujeeddooyinka loo Aasaasay Xafiiska Diiwaanka Sekada

1. Dhaqan-gelinta waajibka Sekada
2. Faafinta iyo ku wacyi-gelinta dadka ahmiyadda sekada
3. Guddoomidda, uruurinta, qaybinta iyo maamulka sekada si loo xaqiijiyo is-kafaalo qaadashada iyo isu-naxariisashada dadka dhexdooda.

Qodobka 4aad
Xilka iyo Waajibaadka Xafiiska Diiwaanka Sekada

Xilka iyo Waajibaadka Xafiisku waa:

1. Qaadashada iyo dejinta shuruudaha shaqaalaha sekada.
2. ka-guddoomidda qofka bixinaya sekada qadarka sekada eek u waajibtay.
3. Aqbalaada qiraalka saka-bixiyaha.
4. Dhigidda sekada xisaabta Xafiiska ee baanka dhexe ee Somaliland.
5. U qaybinta sekada qaybaha sharecada islaamku u xaddiday, iyada oo masaakiinta iyo dadka saboolka ah (foqorada) la siinayo wax ay kaga-maarmaan sekada.

Qodobka 5aad

Qaab –dhismeedka Xafiisku wuxuu ka kooban yahay:



1. Guddida La- talinta
2. Gudoomiye
3. Guddoomiye Ku –Xigeen
4. Agaasimaha Guud

Qodobada 6aad

Guddida La –talinta

Guddidu waxay ka koob naan doontaa:

1. Wasiirka Wasaaradda Diinta Iyo Awqaafta
2. Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada
3. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
4. Laba xubnood oo Madaxweynuhu soo magacaabayo, oo noqon doona Guddoomiye iyo Guddoomiye ku – Xigeen.

Qodobka 7aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Xilka iyo Waajibaadka Guddida waa ka talo-bixinta:

1. Hagidda iyo maamulidda hawal-qabadka Xafiiska
2. Hubinta in hawlaha sekedu u fuleen si waafaqasan sharecada islaamka
3. Miisaaniyadda Xafiiska
4. Qorshaha fog iyo ka dhaw ee xafiiska
5. Uruurinta iyo qaybinta sekeda
6. Baahiyaha iyo arimaha la soo gudboonaada xafiiska
7. Qorshaha shaqaale qorista ee Xafiiska Diiwaanka ee uu soo jeediyo Agaasimaha Xafiiska Diiwaanku.

Qodobka 8aad

Shurudaha Guddomiyaha iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka



Guddoomiyaha ama Guddoomiye ku-xigeenka Xafiisku waa in

1. Uu yahay Muwaadin reer Somaliland ah oo Muslim ah kuna dhaqma Diinta islaamka, Da'diisuna aanay ka yareyn 35sano.
2. Uu leeyahay khibrad maamul oo uu kaga soo shaqeeyey Hay'addaha Dawlada ama dhiigooda, oo aan ka yareyn 3sano.
3. Aanu kicin (musalifin) ama aanu caydhoobin
4. Shanti sanno ee u dambeysey Maxkamadi ku ridin xukun ciqaab.

Qodobka 9aad


Xilka Iyo Waajibaadka Guddomiyaha Xafiiska Diiwaanka

Guddomiyaha Xafiisku Wuxuu u Xil saran -yahay :

1. Go'aaminta qaybinta Maalka sekeda
2. Kobcinta iyo Isku -duwidda xidhiidhka uu leeyahay Xafiiska Laamaha kale ee Dawlada.
3. Metelaada iyo ku hadalka magaca Xafiiska Diiwanka Sekada
4. Saxeexidda qoraallada rasmiga ah ee xafiiska
5. Magaacaabista guddi -hoosdaayo, isku -dubaridka iyo dabal galka hawlaha guddi - hoosaadyada.
6. Furidda lambar xisaabeedka Xafiiska
7. Daba -galka iyo hubinta in hawlaha Xafiiska Diiwaanku u fuleen si waafaqsan sharecada islaamka.

Qodobka 10aad

Awoodaha Guddomiyaha Xafiiska Diiwanka



Guddoomiyuhu si uu u gud to xilkiisa wuxuu awood uu leeyahay

1. Gelidda heshiisyada lagama –maarmaanka u ah xil gudashada Xafiiska
2. Go'aaminta qaybinta maalka sekeda iyo sadaqooyinka si waafaqsan shareecada islaamka
3. Qaadista talaabooyinka lagu hormarinayo maamulka , soo ururinta iyo qaybinta sekada.
4. Dejiinta qorshayaasha Xafiiska.

Qodobka 11aad

Xilka, waajibaadka iyo awoodaha guddomiye ku – xigeenka xafiiska

Guddoomiye ku-xigeenka xafiiska diiwaanku wuxuu u xil-saaranyahay

1. In uu ka caawiyo guddomiyaha xil gudashadiisa.
2. In uu qabto xilka uu u igmado.
3. In marka uu maqan-yahay guddoomiyuhu ama sababo ka baxsan awoodiida u gudan –kari waayo xilkiisa ,fuliyo xilka iyo waajibaadka guddomiyaha eek u xusan qodobka 9aad ee xeerkan ,isla markaana adeegsado awoodaha guddomiyaha eek u xusan qodobka 10aad ee isla xeerkan,

Qodobka 12aad

Shuruudaha agaasimaha guud ee xafiiska diiwaanka sekada

Shuruudaha agaasimaha guud ee xafiiska diiwaanka sekadu waa in uu:

1. Yahay muwaadin reer Somaliland ah oo Muslim ah kuna dhaqma diinta islaamka.
2. Da'diisuna aanay ka yarayn 25sno,
3. Leeyahay khibrad maamuul oo uu kaga soo sheqeeyey hay'addaha dawladda ama dhigooda, oo aan ka yarayn3 sanno
4. Yahay ruux aan kicin(musalifin) ama aan caydhoobin
5. Shantii sanno ee u dambeysey maxkamadi ku ridin xukun ciqaaba ah.



Qodoka 13aad

Xilka iyo waajibaadka agaasimaha guud ee xafiiska diiwaanka

Xilka iyo waajibaadka agaasimaha guud waa:

1. Diyaar –garaynta miisaaniyada sannadeedka;
2. Hagidda, maamulidda iyo kor u qaadida tayada shaqaalaha xafiiska diiwaanka.
3. Diyaarinta qorshaha qaab-dhismeed iyo shaqaalaynta kaas oo ay ku jirto cabirka mushaharka iyo qaabka shaqo qorista.
4. Isku- dheelitirka miisaaniyadda iyo diyaar –garaynta xisaab- xidhada xafiska.
5. Diyaar-garaynta qorshayaasha dhaw iyo kuwa fog ee xafiiska.

Qodobka 14aad

Maaliyadda xafiiska diiwaanka

Maaliyadda xafiisku waxay ka imanaysaa ilahan soo socda:

1. Sedada laga guddoomo ama laga soo ururiyo dadka ay ku waajibtey.
2. Qadarka maaliyadeed ee looga qoondeeyo miisaaniyadda qaranka.
3. Hibada iyo sadaqadaha aan shuruudda ku xidhnayn

Qodobka 15aad

Maaliyadda iyo Hab-Xisaabeedka Xafiiska Diwaanka



Hab -Xisaabeedka Xafiisku waa in uu:

1. Ahaado mid sax ah oo hufan islamarkaana ay ka muuqato dakhligiga iyo kharashkuba taas oo ku salaysan hannaan xisaabeedka dalka.
2. Xisaab-xidh saddex biloodle ah u gudbiyo madaxweynaha iyada oo uu u soo marinayo wasiirka diinta iyo awqafta

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3056/032015

DATE....07/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0461/0322015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 12aad, Faqradiisa 7aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Qoraalka Wasiirka Wasaaradda
Diinta iyo Awqaafta;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Sheekh Siciid Maxamed Faarax Jire, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Xafiiska Diiwaanka Sekada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3057/032015

DATE....07/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0462/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 12aad, Faqradiisa 7aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Helay: Qoraalka Wasiirka Wasaaradda
Diinta iyo Awqafta;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Sheekh Cawil Faatax Shire, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye Ku-xigeenka Xafiiska Diiwaanka Sekada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3058/032015

DATE....07/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0463/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 12aad, Faqradiisa 7aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Helay: Qoraalka Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqafta;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Sheekh Ibraahin Axmed Siciid, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Xafiiska Diiwaanka Sekada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3082/022015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0464/032015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Prof. Faarax Cilmi Maxamuud (Geedoole), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

REPUBLIC OF



SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3083/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0465/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiirka Wasaaradda Beeraha ee Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Maxamed Aw Daahir Ibraahin, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Beeraha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3084/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0466/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Shucayb Maxamed Muuse, laga bilaabo faariikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3085/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0467/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;



Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Maxamed Faarax Ducaale, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3086/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0468/032015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey:

Ahmiyadda weyn ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay:

In baahi loo qabo magacaabidda iyo buuxinta jagada Wasiiru

Dawlaha Wasaaradda Biyaha ee
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Cabdisalaan Maxamed Xasan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Biyaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3087/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0469/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,
Xarafta t ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey:

Ahmiyadda uu Baanka Dhexe u
leeyahay Dhismaha Qaranka,

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Cabdilaahi X. Jaamac Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3088/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0470/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Yuusuf Axmed Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3091/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0471/032015

Magacaabid
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda Wakaaladda Biyuhu u leeyahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeye Ku-xigeenka Wakaaladda Biyaha Hargeysa;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Cismaan Cabdilaahi Hirad, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Wakaaladda Biyaha Hargeysa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3092/032015

DATE....14/03/15

XEER MADAXWEYNE Lr:0472/032015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tix-geliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusay
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aamiyey

In Mudane, Warsame Faarax Ibraahin, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.


Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE Lr:0473/032015



Cafis Madaxweyne
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Cigaabta Guud;
- Markuu Tix-geliyey: Qoraalka Soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka iyo Qoraalka Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Wuxuu go'aamiyey

In uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo maxaabiista xukuman ee ku jira Xabsiyada hoos ku xusan, faahfaahintooduna ay ku caddahay qoraalka lifaaqa:

- | | |
|----------------------------|------------|
| 1. Xabsiga Dhexe Mandhera: | 77 Maxbuus |
| 2. Hargeysa: | 68 |
| 3. Burco: | 108 |
| 4. Ceerigaabo: | 33 |
| 5. Boorama: | 40 |
| 6. Berbera: | 39 |
| 7. Laascaanood: | 7 |
| 8. Gabiley: | 19 |
| 9. Balligubadle | 15 |
| 10. Caynabo: | 5 |
| 11. Gar-adag: | 11 |
| 12. Ceel-afweyn: | <u>30</u> |

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/1-3038/022015

DATE....27/02/15

Ku: Mudane, Ibraahim X. Nuur Diiriye,
Guddoomiyihii Guud ee Hore ee Hay'adda
Shaqaalaha Dawladda
Hargeysa

Og: Guddoomiyaha Cusub ee Hay'adda
Shaqaalaha Dawladda
Hargeysa

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynay.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Xasan Aadan Geedi, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Guddoomiyaha Cusub ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/1-3039/022015

DATE....27/02/15

**Ku: Mudane, Cabdiraxmaan Jaamac Cabdalle,
Wasiiru-dawlihii Hore ee Wasaaradda
Xannaanada Xoolaha
Hargeysa**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda Xannaanada Xoolaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cali Maxamed Cilmi (Gadh-dheer), oo aan xilka Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha ee Jamhuuriyadda Somaliland u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3048/032015

DATE....04/03/15

**Ku: Mudane, Axmed Maxamed Jaamac Aadan
Mareeyihii Hore ee Hay'adda Laydhka**

Hargeysa

Hargeysa

**Og: Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud,
Guriyeynta iyo Gaadiidka**

Hargeysa

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Ka-dib markii cabashooyin is-daba-jooq ahi ka yimaadeen Maamulka Hay'adda Laydhka Hargeysa, kuwaas oo ku saabsan dayn badan oo ay gashay Hay'adda laydhku, horusocod la'aan, isla markaana tahli kari wayday inay isku filnaansho gaadho. Sidaas darteed, waxaan ogolaaday Maalgelinta (PPP) ee Warshada Laydhka Hargeysa ee ku xusan qoraalkayga summaddiisu tahay JSL/M/WG/235-2681/092014, kuna taariikhaysan 02/09/14.

Hadaba, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Mareeyaha Hay'adda Laydhka Hargeysa. Waxaan kuu rajaynayaa niyadsami iyo mustaqbal wacan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/1-3049/032015

DATE....04/03/15

**Ku: Mudane, Cabdillaahi Yuusuf Cilmi Dubad
Mareeye Ku Xigeenkii Hore ee Hay'adda
Laydhka Hargeysa
Hargeysa**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud
Guriyeynta iyo Gaadiidka
Hargeysa**



Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Ka-dib markii cabashooyin is-daba-joog ahi ka yimaadeen Maamulka Hay'adda Laydhka Hargeysa, kuwaas oo ku saabsan dayn badan oo ay gashay Hay'adda laydhku, horusocod la'aan, isla markaana tahli kari wayday inay isku filnaansho gaadho. Sidaas darteed, waxaan ogolaaday Maalgelinta (PPP) ee Warshada Laydhka Hargeysa ee ku xusan qoraalkayga summaddiisu tahay JSL/M/WG/235-2681/092014, kuna taariikhaysan 02/09/14.

Hadaba, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Mareeye Ku-xigeenka Hay'adda Laydhka Hargeysa. Waxaan kuu rajaynayaa niyadsami iyo mustaqbal wacan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/1-3049/032015

DATE....04/03/15

**Ku: Mudane, Cabdi Dirir Cabdi,
Guddoomiyihii Hore ee Baanka Dhexe ee
JSL Hargeysa**



Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan aan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cabdilaahi X. Jaamac Cali, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3090/032015

DATE....14/03/15

**Ku: Dr. Cismaan Xuseen Warsame,
Agaasimihii Hore ee Wasaaradda
Caafimaadka Hargeysa**



Og: Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan aan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Yuusuf Axmed Cali, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa in uu labadaa masuul u kala wareejiyo xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3093/032015

DATE....14/03/15

**Ku: Mudane, Khadar Xasan Xirsi,
Guddoomiye Ku-xigeenkii Hore ee
Gobolka Hawd ee JSL Balligubadle**

**Og: Guddoomiyaha Gobolka Hawd ee JSL
Balligubadle**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis


Mudane,

Waxaan aan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Warsame Ibraahin, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Guddoomiyaha Gobolka Hawd, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa in uu labadaa masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA AFRAAD:
AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/34/2015.

03/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HASHIMI CONSTRUCTING AND INTERIOR DESIGN, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **HASHIMI CONSTRUCTING AND INTERIOR DESIGN, Astaanteeduna tahay:-** (TNH ORIENT), shaqadeedu tahay Dhismaha iyo Nashqadeynta (Contracting and Interior Design), xaranteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 25/02/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



TIX:- XIG/JSL/35/2015.

03/03/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

